## HEL BUUGGAAG BADAN

Buuggaagta kiishka waxaa la akhriyi karaa dhowr wakhti. Laakiin sidoo kale waxaad akhriyi kartaa buugaagta kale. Tusaale ahaan, adiga iyo ilmahaaga waxaad ka ammaanaysan kartana buuggaag badan maktabadda ama bogga www.aakb.dk.

Waydkii masuulka maktabadda ama macalinka  inuu kaa caawiyo fikradaha buuggaagta wa-anaagsan ee ku habboon ilmahaaga.

Waxaad ka heli kartaa buuggaag kale boggan https://www.aakb.dk/tags/temalister-boern-unge.

Sidoo kale waxaadka ammaanaysan kartaa buuggaagta elektarooniga ah www.eReolen.dk iyo www.eReolenGo.dk

Waxaad ka heli kartaa macluumaad labbadaba  eReolen iyo eReolen Go ab ahaan halka buuggaagta lagu akhriyi karo/lagud hegaysto ama iyaddoon lahayn xidhiidhka internatka.
Marka ilmahaagu soo galo UNI, waxaad buuggaagta ka akhriyi kartaa:
www.superbog.dk
www.læsløs.dk

Waxaad ku qori kartaa sheekooyinka gaagaaban abka "Skriv og læs" ama bogga www.skrivoglæs.dk

## AKHRI WAX BADAN OO KU SAABSAN READ

Waxaad ka akhri kartaa wax ku saabsan READ - wada akhriska oo hel agab ku qoran dhowr luqaddood oo kala duwan boggan internatka , www.aarhus.dk/read.

BØRN OG UNGE
Aarhus Kommune



# READ

## – WADA AKHRISKA FASALKA 0

# READ

## – WADA AKHRISKA FASALKA 0

## WAXAAD MUHIIM U TAHAY WAALID AHAAN

Waalid ahaan, waxaad haysataa fursada aad ku toosiso waydiin badnida ilmahaaga, farxada akhriska iyo inaad xoojiso fursadaha ilmahaaga uu ku wanaagsanaado akhriska iyo qoraalka. Akhriska iyo qoraalku waa u muhiim sida uu wax u barto ilmahaagu gudaha dugsiga iyo nolosha mustaqbalka.

Markaad la akhrido buuggaaga ilmahaaga, ka hadal qoraalka oo ku maaweeli qoraalka iyo hawlaha maalinlaha ah. Tani waxay caawisaa horumarinta xirfadda luqadda ilmahaaga iyo aqoonta kelmadda qoran.

## AKHRI OO KALA HADAL ILMAHAAGA

Waxaad u noqon kartaa caawimo wayn ilmahaaga haddii aad akhrido buuggaagta oo aad wada jir uga hadasho.

Kala hadalka ilmahaaga wax ku saabsan buuga KA HOR, MUDDADA LAGU JIRO iyo KA DIB akhriska  uu yahay fikrad wanaagsan. Waxaad ka hadli kartaa wax ku saabsan sawirada, kelmadaha, tusmada ama wax kasta oo kale oo niyada ku soo dhaca markaad akhriyayso. Wada sheekaysiga buugu ha ka yimaado waxa uu ilmahaagu xiiseeyo. Waxaad ka caawin kartaa ilmaha addoo kelmado ku daraya sheekada oo caddee sharaxa.

Aqoonta wayn ee  ilmahaagu uu leeyahay waxyaabaha ku saabsan iyo kelmaddaha badan ee ilmahaagu yaqaano ee isticmaalo, sida wanaagsan ee ilmahaagu uu noqon doono fahmida macluumaadka buuggaagta. Waa muhiim inaan laga boodin kelmaddaha aad u malaynayso inay ku adag yihiin ilmahaaga. Sharax ama si la doorbido muuji kelmaddaha iyo weedhaha uu ilmahaagu aanu garanayn.

Markaad waydiiso su'aalo furan oo waydiimo ah, ilmahaagu waxa uu si aad u firfircoon uga qayb galaa wada sheekaysiga ku saabsan buugga. Samaynta tana, luqadda ilmaha iyo rabitaanka lagu xidhiidhiyo way kacdaa: Sii naftaada wakhti wanaagsan oo aad ku dhegaysato ilmahaaga oo aad kaga jawaabto su'aalahiisa iyo kuweeda.

Ilmahaagu waxa uu haystaa wakhti fudud oo uu ku barto akhriska oo uu ku qoro haddii aad ka caawiso isaga ama iyadda inuu iska jiro sida yihiin kelmaddaha iyo xarfaha ay u eegyihiin oo ay u dhawqaan. Markaad dhammayso akhriska buugga, waxaad ka hadli lahayd wax ku saabsan kelmaddaha ku bilaabma isku xaraf iyo dhawaqa.

Waxaad ka heli caawimo xaashida " Sida loola akhriyo ilmahaaga".

Haddii aad ku hadasho luqad kale oo aan Danish ahayn, waxaad sidoo kale isticmaali karta markaad ka hadasho wax ku saabsan buugga. Kula hadal ilmahaaga luqad aad ku fiicantahay. Sidoo kale waxaad ku akhriyi kartaa luqaddaada hooyo



## WAKHTIGA IYO RABITAANKA AKHRISKA

Marka wakhtiga akhriska lagu qaatay noqdo wakhti farxad leh oo u dhexeeya adiga iyo ilmahaaga, ilmahaagu waxa uula kulmi doonaa farxada akhriska iyo wada sheekaysiga ee ku saabsan buuggaagta. Ilmahaagu waxa uu dooni doonaa inuu akhriyo marka uu la kulmo xiisahaaga.

Iska ilaali dhibista ama faragelinta marka aad akhriyayso. Waxaad ka fekeri kartaa meesha iyo goorta ay ugu wanaagsantahay in wax lawada akhriyo.

Sidoo kale akhri inta badan ee suuragalka ah.

Waa fikrad fiican in la akhriyo buuggaag isku mid ah dhowr wakhti. Sababtoo ah wakhti kasta buuggaagta la akhriyo, waxaad helaysaa kelmaddo cusub ama mowduucyada aad ka hadli karto.

Si la door bido la soo hel buuggaagta ilmahaaga. Tusaale ahaan, isku day inaad ogaysiiso ka uu yahay mowduucyada iyo buuggaagta xiisaha ilmahaaga.

Markaad ula akhrido buuggaag kala duwan si wada jir ah ilmahaaga, xiisaha ilmahaaga iyo aqoonta qoraaladu way kobcaan.

## TAAGEERIDA ILMAHAAGA AKHRISKIISA KOOWAAD EE MADAXA BANAAN

Laga yaabaa in ilmahaagu uu doonayo inuu akhriyo buug yar isaga laftiisu.

Waa muhiim inuu ilmahaagu yeesho khibrada uu laftiisu wax ku akhriyo -xataa in kastoo uu xusuusanayo ama qiyaasayo. Iska ilaali saxitaanka khaladaadka ilmaha ilaa ay saamayso fahanka waxa la akhriyayo.

Markaad dhiirigeliso ilmahaaga oo aad xiiso umuujiso akhriska ilmahaaga, ilmahaagu waxa uu dooni doonaa inuu wax badan akhriyo.

Waxay caawin kartaa ilmahaaga haddii aad ugu horayn ugu akhrido buuggaagta si cod dheer ilmahaaga.

Waxaad ka heli doontaa akhriska xaashida "Sida loo taageero akhriska koowaad ee madaxa banaan".

## WAX LA QOR ILMAHAAGA

Marka ilmahaagu arko waxaad qorayso oo aad akhriyayso, waxa uu ogaanayaa waxa qoraalada loo isticmaalo oo waxaa uu xiisaynayaa akhriska iyo qoraalka laftiisa. Ilmahaagu ha ku ciyaaro qoraalka. Tusaale ahaan, ilmahu waxa uu qori karaa liiska rabitaanka, fariimaha qoraalka ah ama sheekooyinka gaagaaban. Laga yaabaa ilmaha inuu qori karo xarfaha uu yaqaano ee magaciisa ku jirta. Ilmahu waxa uu bilaabi karaa dhegaysiga codadka oo waxa uu ku xidhiidhiyaa xarfaha. Waa muhiim in aad adigu qirto sku dayga qoraalka ilmahaaga. Ilmahaagu ha haysto khibrada uu ku muujin karo naftiisa isagoo isticmaalaya qoraalka.